AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Degitaanka

Akharinta Fudud



Sida ugu dhaqsaha badan oo loo dego nolosha cusub ee Australia waa:

- barashada Ingiriisiga



- helidda shaqada




- samaynta tababarka



U-guuridda waddan cusub waxay noqon kartaa mid wallaac badan.



Waxaadna ka walwali kartaa xagga:

- gurisiinta iyo halkaad ku noolaan doonto



- helidda shaqada



- sida fiican oo aad Ingiriisga ugu hadli karto



Dowladda Australia waxay bixisaa adeegyo aad adeegsan karto si ay kuu taageeraan intaad degayso.

Wazaaradda Adeegyada Bulshada (Department of Social Services - DSS) waxay maamushaa barnamijka barnaamijka Dejinta Banii-adamnimada ah (Humanitarian Settlement Program - HSP).



Barnaamijku wuxuu dadka siiyaa taageerada ay u baahan yihiin.



Taageerada aad heli doonto waxay ku xirnaan doontaa:

- baahiyahaaga
- qoyskaaga




Bilowga hore waxaad caawimaad ka helaysaa:

- Qofka-shaqaalaha ah



- qofkii ku-isboonsarey




Waxay:

- kugula kulmi doonaan madaarka



- ku geynayaan meesha aad degi doonto



Waxaa jira waxyaalaha qaarkood oo aad u baahan doonto inaad samayso dhowrka asbuuc ee ugu horreey ee aad Australia joogto.




Tallaabooyinka hoose waxay ku tusayaan:

- waxaad u baahan tahay inaad qabato



- markaad u baahan tahay inaad qabato




Garwadeenkaaga ayaa kugu caawin doona mid kasta oo tallaabooyinkan ah.

## Asbuuca 1aad




Imow garoonka Australia.

Waxaa kugula kulmaya:

- Qofka-shaqaalaha ah



- qofkii ku-isboonsarey



U socdaal meesha aad degi doonto.




Furo akoonka bangiga.



Baro sida loo adeegsado akoonkaaga iyo sida:

- Loogala soo baxo lacagta – lacagta looga soosaaro




- Loo dhigto lacagta – lacagta loogu shubo




Iska diiwaangeli Centrelink si aad uga hesho Dowladda lacag-bixinnada taageerada ah.




Iska diiwaangeli Medicare si aad u hesho taageero wixii daryeelka caafimaadka aad u baahan tahay.




Hel Lambarkaaga Galka Canshuurta (Tax File Number - TFN) si aad u raadsato shaqo.

## 2da-asbuuca ee ugu horreeya




Ku qor carruurtaada dugsiga.



Baro deriskaaga cusub – meesha aad ku noolaan doonto.



Baro halka laga helo kuwa kuugu dhow:

- xarunta dukaamaysiga




- subarmaarkitka




- isbitaalka



- maktabadda



- gaadiidka dadweynaha — basaska, tareenada




Hel dhaqtarka u dhow halkaad ku noolaan doonto kaas oo ku siin kara daryeelka caafimaadkaaga iyo kan qoyskaaga.

## Lixda bilood ee ugu horreeya




Samee inaad caafimaadkaaga baarto.




Iska-diiwaangeli Barnaamijka Ingiriisiga Soogalootiga Dadka-waaweyn (Adult Migrant English Program - AMEP) si aad u barato Ingiriisiga.




Hel meel cusub oo aad ku noolaato haddii keliya aad deganaanayso guriga muddo gaaban.



Bilow inaad raadsato:

- shaqo



- tababar aad samayn karto si aad u barato xirfadaha shaqo oo cusub

## Guuridda



Cid kasta oo ku nool Australia waxay yeeli karaan inay u kala safraan si xor ah dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada dhexdooda.



Ka-guuridda gurigaagii hore ee Australia waxay noqon kartaa inaad weyso heliddii adeegyada taageerada qaarkood aad ku heli jirtey barnaamijka HSP.




Kahor intaadan go’aansan inaad guurto, ka hel talooyin:

- qofka-shaqaalaha ah



- qofkii ku-isboonsarey



Australia waa waddan weyn oo baaxad ballaaran.



Dadka Australia waxay u wada-xiriiraan ayagoo maraya isgaarsiinta iyo isku-xirada gaadiidka.




Dadka Australia waxay umaraan masaaf dheer si ay usoo booqdaan saaxiibadooda iyo qoyskooda:

- weekendiyada
- fasaxyada



Uma baahnid inaad baddesho halkaad ku nooshahay – waxaa fudud inaad soo booqato saaxiibadaada ama qoyskaaga.



Waxaad adeegsan kartaa gaadiidka dadweynaha sida basaska ama tareennada si aad ugusoo booqato muddo gaaban.

# Magacyada iyo xiriirada muhiimka ah

## Qofka-shaqaalaha ah




Qofka garwaden ah aya laguu qoondaynayaa si uu kaaga caawiyo inaad degto haddii fiisadaadu tahay qaybahan hoose:

- 200
- 201
- 203
- 204



Garwadeenadu waxay ka socdaan haya'daha kuwaas oo qayb ka ah barnaamijka HSP.



Garwadeenkaagu:

- wuxuu kugula kulmayaa garoonka



- wuu ku taageerayaa intaad degayso



Mar kasta kulama joogi karaan.




Waxaad u baahan tahay inaad hanato waxyaalo badan adigu.



Waxaa jira dad badan oo ka shaqeeya haya'daha dowladda ee kala duwan.

Waa shaqadooda inay ku caawiyaan.

## qofkii ku-isboonsarey



Qofkii ku isboonsaray ayaa ku caawin doona inaad degto hadii fiisadaadu tahay qaybta 202.



Qofkii ku isboonsaray badanaa waa:

- xubin qoyska ah
- saaxiib
- haya'd bulshon



Garwadeenku wuxuu samayn karaa waqti uu la kulmo adiga iyo qofkii ku isboonsaray.



Waxay ka shaqaynayaan haddii aad u baahan tahay waqti dheeraad ah.

## Wacigelinta Dibadda



Waxaad tagaysaa kulamada fasalka dhexdiisa ah si laguu caawiyo marka kowaad oo aad timaado.



Taasna waxaa loo yaqaan wacyigelinta dibadda.



Wacyigelinta dibadda waxay ku dhisan tahay waxaad ka barato AUSCO.



Waxay ku siinaysaa:

- aqoon
- xirfado aad isticmaali karto



Waxay kugu caawin doontaa inaad waxaad soo baratay ku hirgeliso bulshadaada cusub iyo magaaladaada.




Waxaad aadi kartaa dalxiis gaaban – nashaadyada ka baxsan fasalka.



Wacyigelinta onshore-ka waa hab fiican:

- oo su'aalahaaga laga jawaabayo



- oo aad wax uga baran karto dadka kale kuwaas oo noloshoodu ay la mid tahay taada.



- aad ku baran karto sida wax loo sameeyo sida
  - helidda meel lagu noolaado




  - miisaaniyad-samaynta – ka-shaqaynta inta lacag aad haysato iyo sidaad u qarash-garayn karto




Qof ayaa ku gayn kara dukaamada goobtaada ku yaala kuwaas oo leh sicirada ugu hooseeya.




Taasi waxay kaa caawinaysaa inaad wax ka barato miisaaniyad-samaynta.



Waxaad wax badan ka baran kartaa wax ku saabsan sharciga Australia adigoo la hadlaya:

- booliiska



- qareenada



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada dejinta ee websiteka Wasaaradda ee Adeegyada Bulshada [www.dss.gov.au](http://www.dss.gov.au)

## Adeegyada Fasiraadda iyo Turjumidda



Haddii aad u baahato turjumaan, fadlan ka wac Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda (Translating and Interpreting Service - TIS National) taleefanka 13 14 50.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan TIS National websitekooda.
www.tisnational.gov.au/en/Non-English-speakers


## Centrelink



Centrelink waa adeeg ay maamusho Dowladda Australia si loo caawiyo dadka u baahan taageerada.





Waxaad awoodi kartaa inaad lacag ka hesho Centrelink.




Centrelink waxay lacagta kuugu soo shubaysaa akoonka bangigaaga 2dii asbuucba mar.



Qadarka lacagta aad hesho wuu ka duwanaan karaa qadarka uu qof kale helayo.




Centrelink waxay ka shaqayn doontaa intay le'egtahay lacagta lagu siinayo taas oo ku salaysan xaaladda shaqsinimadaada.

## Barnaamijka Ingiriisiga Soogalootiga Dadka-waaweyn




Waxaad yeeli kartaa inaad Ingiriisiga ka barato AMEP.




AMEP waxay ku siin kartaa 510 saacadood oo ah fasallada luqadda Ingiriisiga oo lacag la'aan ah.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan halka laga helo AMEP kuugu dhow ee website-ka soo socda.
[www.education.gov.au/amep](www.education.gov.au/amep)



Waxaad kaloo ka wici kartaa khadka Macluumaad ee Skilling Australia taleefanka 13 38 73.

## Lambarka Galka Canshuurta




Waxaad u baahan tahay TFN si aad u awoodo inaad hesho:

- shaqo
- lacag bixinta Centrelink




Xafiiska Canshuuraha Australia (Australian Taxation Office - ATO) ayaa ku siin doona Lambarka Galka Canshuurta.

Lambarka Galka Canshuurta-kaagu waa mid gaar ah – adiga keliya ayaa adeegsan kara.




Waxay kugu caawinaysaa inaad ka codsato lacag-bixin Centrelink si loo taageero qoyskaaga.




Dadka ka shaqeeya Centrelink ayaa kugu caawin kara inaad hesho TFN.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah websiteka ATO.
www.ato.gov.au


## Medicare




Medicare waa nadaamka daryeelka caafimaadka qaranka Australia.




Medicare waxay kaa caawin karta xaga qarashka ee daryeelka daawada qaarkeed.




Garwadeenkaaga ama qofka ku isboonsaray ayaa ku tusi doona halka kuugu dhow:

- xarunta adeegga Medicare




- Isbitaalka




- xafiiska dhaqtarka



- Adeegyaa caafimaad ee kale.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Medicare website-ka Wasaradda Adeegyada Insaanka (Department of Human Services - DHS). www.humanservices.gov.au/medicare

## Tallaalka



Waxaad u baahan doontaa inaad qaadato hubinta caafimaadka oo buuxda.



Carruurtaadu waa inay qaataan tallaalkooda – daaweyn ka joojinaysa inay xannuunsadaan.



Carruurta waa inaan la tallaalin hase ahaatee waa mid si aad ah loogu taliyey.




Dowlad-goboleedyada iyo taritoriyada qaarkood waxaa lagaa codsan doonaa diiwaannada tallaalka ee ilmahaaga markaad tagayso:

- daryeelka maalinta
- dugsiga



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka websiteka Wasaaradda Caafimaadka (Department of Health).
[www.health.gov.au](http://www.health.gov.au)

*Adeegsiga muuqaalka kaarka Medicare waa ujeeddo muujineed keliya mana ahan ogolaansho laga helay Commonwealth.*

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM